# Xuduudaha Asturnaanta

## Markaanan Macluumaadka si Gaar ah u hayn karin: Ilaalinta Caruurta



**Xaashidan waxey sharxeysaa sababta HSE ugu baahan karaan iney wadaagaan macluumaad xasaasi ah ama shaqsiyed si loo xaqiijiyo badqabka iyo ilaalinta caruurta.**

**Waxaan ixtiraameynaa xaqqaaga asturnaanta waxaana naga go'an inaan macluumaadkaaga si ammaan ah u ilaalino. Hase yeeshee, waxaa jira xuduudo ku xiran qarsoodidan. Xaaladaha qaarkood waxaa nalaga doonaya inaan wadaagno macluumaad.**


**Haddii aan ka walwalsanahay badqabka iyo fayo-qabka cunuga, waxaa laga yaabaa inaan macluumaad la wadaagno Tusla (Hay'adda Carruurta iyo Qoyska) ama An Garda Síochána. Tani waxaa looga baahan yahay sharciga si loo ilaaliyo carruurta.**



## Ilaalinta Caruurta - Waajibaadkeenna Sharciga ah

Badqabka, fayo-qabka iyo horumarka carruurta iyo dhalinyarada waa mudnaanta HSE. Shaqadeena waxaa hagaya sharciga iyo siyaasada, sida:

- Sharciga Kowaad ee Caruurta ee 2015 iyo
- Hagida Qaranka ee Kowaad ee Caruurta ee Ilaalinta iyo Fayo-qabka Caruurta 2017







Waa siyaasadeena in dhammaan shaqaalaha HSE ay Tusla u wargeliyaan marka ay hayaan sababo macquul ah oo walaac ku saabsan in cunug uu noqon karo, uu yahay, ama uu halis ugu jiro in lagu xadgudbo ama la dayaco (la-dhibaateeyo).

Intaa waxaa dheer, qaar kamid ah shaqaalaha HSE ayaa sharciga ku waajib ah inay soo gudbiyaan walaacyo haddii ay aaminsan yihiin in cunug la dhibaateeyey, la dhibaateynayo ama halis ugu jiro in la dhibaateeyo.

**Ireland, sharcigu wuxuu cunug u aqoonsadaa qof kasta oo ka yar 18 sano.**

## Sidee baan u aqoonsanaa Walaaca?

Walaac ku saabsan badqabka ama ilaalinta cunug wuxuu noogu iman karaa siyaabo kala duwan, sida:

- Cunug ayaa noo sheegaya ama muujinaya calaamado in la dhibaateeyey.
- Waxaan arki karnaa ama maqli karnaa wax naga dhigaya inaan aamino in cunug la dhibaateeyey, la dhibaateynayo, ama halis ugu jiro in la dhibaateeyo.
- Qof ayaa wadaagaya walaac in cunug la dhibaateeyey, la dhibaateynayo, ama halis ugu jiro in la dhibaateeyo.
- Qof weyn ayaa noo sheegaya in la dhibaateeyey markay yaraayeen, waxaana aaminena in cunug kale hadda ama mustaqbalka halis ugu jiro isla qofkii.

## Halkee baan cabasho ku gudbinaa?

Tusla waa hay'ada ku taala Ireland oo ka masuul ah xaqiijinta in caruurta ay badqabaan oona si wacan loo daryeelo. Waxey sidookale taageero siiyaan qoysaska.

Haddii aan walaac ka qabno badqabka ama ilaalinta cunug, waa inaan u sheegnaa Tusla. Waxaad ka baran kartaa doorkooda iyo adeegyadooda halkan:

**www.tusla.ie/children-first/**

Xaaladaha qaar, sidookale waxaan u baahan karnaa inaan walaacyada u gudbino An Garda Síochána, ama Tusla ayaa macluumaad la wadaagi karta haddii loo baahdo.

## Waa inaan gudbinaa walaacyo, xitaa haddii:

- Aanan aqoon cunuga ama qofka laga yaabo inuu dhibaatada sababay.
- Aad noo sheegto in walaaca hore loogu soo sheegay Tusla ama An Garda Síochána.
- Aad mardambe go'aansato inaad ka noqoto wax aad sheegtay oo walaac dhaliyey.

## Oggolaanshahaada iyo ilaalinta cunug

Sida caadiga ah, waxaan kaala hadli doonaa walaacyadeena oo waxaan kuu sharaxi doonaa sababta aan u sameyneyno warbixin.

Hase yeeshee, oggolaanshahaada looma baahna si aan u sameyno warbixin. Markay timaado ilaalinta cunuga, sharciga Ilaalinta Xogta iyo Qeynuunka Guud ee Ilaalinta Xogta (GDPR) kama horjoogsanayaan inaan wadaagno macluumaad marka loo baahdo si caruurta loo badbaadiyo.

## Maxaa dhacaya kadib?

Marka warbixin la sameeyo kadib, Tusla ayaa kula soo xiriiri karta si loo uruuriyo macluumaad dheeri ah. Yoolkooda waa inay si buuxda u fahmaan xaaladda si ay u ilaaliyaan una taageeraan cunug kasta oo halis ku jira.

Wada-shaqeyntaada waa muhiim. La'aanteed Tusla waxa ku adkaan kartaa inay cunug ka ilaaliso dhibaato.

## Adeegyada taageerada

Waan fahamsanahay in nidaamkan kuugu adkaan karo, adigana waxaad u baahan kartaa taageero.

Adeegyo ayaa diyaar u ah inay ku caawiyaan. Badanaa adeegyadan waa bilaash oo uma baahna gudbin. Wixii macluumaad dheeri ah, booqo mareegta HSE:

**Taageerada iyo adeegyada caafimaadka maskaxda- HSE.ie**

## Waxa la sameeyo haddii aad qabto walaac

Haddii aad ka walaacsan tahay badqabka ama fayo-qabka cunug, ha aamusin. U gudbi walaacaada Tusla iyo/ama An Garda Síochána.

## Macluumaad dheeri ah

**Si aad wax badan uga barato Siyaasadda HSE ee Ilaalinta iyo Badqabka Cunugga, booqo:**

**www.hse.ie/childrenfirst**

**Iskaan garee koodhka QR ama booqo: https://www.hse.ie/eng/services/list/2/primarycare/childrenfirst/hse-child-protection-and-welfare-policy/**

**Xaashidan waxaa loo fasirey luuqado kale. Iskaan garee koodhka QR ee hoos ama booqo https://www.hse.ie/eng/services/list/2/primarycare/childrenfirst/resources/limits-to-confidentiality.html**



HCF01804